

GUDIGA DUGSIYADA EE MAGAALADA BOSTON



FARRIIN OGEYSIINAH

KU: Guddiga Dugsiga Boston
OG: Brenda Cassellius, Kormeere Guud
KA: Dr. Hardin LK. Coleman
MAWDUUCA: Yoolalka Waxqabadka Kormeeraha Guud ee SY 2020-21
TAARIKH: Janaayo 13, 2021

Ku lifaaqan, fadlan raadi/hel yoolalka waxqabadka sanadlaha ah taasoo Dr. Cassellius ogolaaday in lagu qiimeeyo Guga soo socda. Kormeeraha guud waa in lagu amaanaa sida ay oga qayb qaadatay hawshan iyada oo maareynaysa saameynta cudurkan safmarka ah marka loo eego labadaan dhinac oo ah howlaha degmada iyo waxbarashada ardayda.

Kormeeraha guud ayaa sidoo kale ku amaanan u adkeysiga shaqada nagu qaadaneysa inaan noqono kuwo natiijo u janjeedha, halkii aan ka ahaan lahayn degmo dib usocod ah. Sidaadba arki karto, Kormeeraha guud wuxuu u heellan yahay in lagu qiimeeyo hiigsiga la xiriirta natiijada ardayga halkii laga hirgelin lahaa istiraatiijiyad lagu gaaro himilooyinkaas. Tani waxay tallaabo weyn oo horay loo qaaday utahay Degmada, maadaama ay udub dhexaad u noqon doonto dhammaan wadhadalladeena ku saabsan sida go'aannadu u saameyn doonaan natiijada ardayda ee degmada oo dhan.

Ka hor inta aanan loo codeynin in la aqbalo yoolalkaas, waxaa jira dhowr digniin oo u baahan in la aqoonsado. Mida hore ayaa ah, aafada faafidda cudurkan awgeed, waxaan saadaalin karnaa hoos u dhac ku yimaada natiijada ardayga taas oo ka dhalatay waqtigii waxbarashada oo lumay. Tan labaad waxa weeye, aafada faafidda cudurkan awgeed, waxa laga yaabaa inaanu awoodi doonin inaanu dhammaystirno sida caadada eheed qiimaynta waxbarashada ardayga. Kormeeraha guud waxaa ka go'an sahaminta adeegsiga halbeegyo kale oo is bedbeddelaya. Aniga iyo Madaxa waxaan si joogto ah ula sheekaysan doonnaa kala doorashooyinka.

Ugu dambeyntiina, sida qaar badan oo ka mid ah degmooyinka nala midka ah, waxaan ku darnay yool wax looga qabanayo maaraynta Kormeeraha guud ee sida aafada faafidda cudurkan u saameysay Degmada. Sida aan ugu gudbeyno wajiga xiga ee hawshan, waa inaan ahaano kuwo xasaasi ah una furan saameynta dhibaatan ay ku leedahay sida aan u qiimeyno waxqabadka Kormeeraha guud.